

Ilaali Naftaada Maka aad Nadiifinayso Waxyaabaha burburay Banaanka Daadka Ka dib

Daadadkii ugu danbeeyay waxaa dhici karta inay saamayn ku yeesheen badqabka qaybo kamid ah meelaha bulshadeenu dagantahay. Meelaha banaanka ah, waxyaabaha khatarta ah ee muuqda oo ka dhasha waxyaabaha ka hara burburka ayaa ah khatarta ugu weyn ee dadku wajahayaan waxaana ka dhalan kara dhaawacyo.

Wasakhda ka dhalata biyaha daadka ah uma muuqato inay keenayaan khatar caafimaad. Jeermisyadu kuma noolaadaan muddo dheer iftiinka qoraxda roobka ayaa caawiya in meesha la dhaafiyo. Kiimikooyinka, haddii ay jiraan, waxay noqonayaan kuwo heerkoodu aad u hooseeyo.

Carruurta, dadka qaba dhibaatooyinka neefsashada (tusaale ahaan, cudurka neefta), iyo dadka habkooda difaaca jirku liito waa inaysan ka qaybqaadan nadiifinta daadka ka dib.

Gacmahaaga Dhaqo.

- Mar kasta waxaa aragti wanaagsan ah inaad gacmaha dhaqato ka dib marka aad ka shaqayso goobaha daadadku ka dhacaan.

Xiro Dharka Difaaca.

- Xiro surwaalo iyo shaati gacmo dheere ah, kabo daboolan, iyo galoofisyo si aad naftaada u ilaaliso marka aad wax qiimaynayso aadna nadiifinayso.
- Haddii meeshu boor leedahay, xiro muraayadaha wayn ee indhaha iyo qalabka neefsiiyaha N95.

Soo gudbi Astaamaha Wasakhowga Kiimikada.

- Haddii aad aragto astaamaha wasakhowga kiimikada ah sida dhibco saliid ah, ka fogow goobta oo uga warbixi tan kooxda waxyaabaha qubta ee Gobolka Vermont –
Wac 1-800-641-5005 or 802-828-1138.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan muuqaalada qaabka loo:

HealthVermont.gov/Flood